**XEERKA NIDAAMKA URURADA IYO AXSAABTA SIYAASADA IYO WAX KA BEDELKII HIRGALEY**

*Xeerkani wuxuu markii hore dhaqangaley 20kii Ogosto 2011 oo Madaxweynuhu saxeexay (sida ku xusan Dikriitada Madaxweyne ee ku lifaaqan Xeerkan). Wax ka bedelkii Xeerkuna wuxuu dhaqangelay 13kii Diisambar 2011 Markii Madaxweynuhu saxeexay (sida ku xusan Dikriitada Madaxweyne ee labaad ee ku lifaaqan Xeerkan).*

*Waxaa halkan hoos qoran Xeerkii Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada iyo Wax ka bedelkiisii oo dhan. Qodobadda Wax ka bedelka waxay ku qoranyahay far leexsan (in Italics).*

*Ibrahim Hashi Jama, www.somalilandlaw.com*
*22/12/2011*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**
**XEERKA NIDAAMKA URURADA IYO AXAABTA SIYAASADA**
**IYO WAX KA BEDELKIISII HIRGALEY (*oo far leexsan ku qoran*)**
**XEER No. 14/2011**

**GOLAHA WAKIILADA**

**Markuu arkay:** **Qodobka 9aad, 22aad, iyo 23aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu arkay:** Xeer Madaxweyne ee Lr: **0165/072011** ee tixraaca **RSL/M/ERM/249-635/07211**, ee Furashada Ururada Siyaasadeed iyo Geedi Socodka Doorashooyinka iyo kaabista iyo wax kabalka **Xeer Lr.14/2000**.

**Markuu Xaqiijiyay**: In ay lagama maarmaan tahay in la abuuro Xeerar iyo Shuruuc kala hagta sida ay Muwaadiniintu u gudan karaan xuquuqdooda siyaasadeed si waafaqsan Dastuurka iyagoo uga qayb-qaadanaaya hawlaha siyaasadeed si nabagelyo ah si ay awoodda dalka u hantaan.

**Markuu Tixgaliyay:** In muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin in ay helaan xuquuqdooda siyaasadeed iyo gudashada waajibaadka saaran marka ay abuurayaan Ururo siyaasadeed iyo in la habeeyo mabaadii'da iyo Shuruucda kala hagaysa Xisbiyada qaranka ee Shakhsiyadda Qaanuuniga ah leh.

**Markuu Ku Qancay:** Baahida loo qabo in dib-u-habayn iyo Wax-ka-beddel lagu sameeyo Xeerka Nidaamka Axsaabta/Ururrada Siyaasadda, Xeer Lr. 14/2000.

**WUXUU**
**KAABIS IYO WAX-KA BADAL KU SAMEEYEY:**

**Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer LR 14/ 2000**
**Wuxuuna soo saaray Xeer Lr. 14/2011**

## QAYBTA 1AAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad: Eraybixin

1) "**Guddi**": Waxaa loola jeedaa Gudidda diwaangelinta ururada siyaasada iyo Ansixinta xusbiyada Qaranka.
2) "**Komishan**": Waxaa loola jeedaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ).
3) "**Gobol/Degmo**": Waxaa loola jeedaa Gobollada iyo Degmooyinka ku xusan Xeer Lr. 23/2002.
4) "**Urur Siyaasadeed**": Waxaa loola jeedaa koox muwaadiniin ah oo wadaaga fikir siyaasadeed oo isu-diiwaan-geliya Urur ahaan si ay uga qayb-qaataan doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka ka hor inta aan loo aqoonsan xisbiyo Qaran.
5) "**Xisbi/Xisbiyo**": Waxaa loola jeedaa Xisbi/Xisbiyada Qaran ee la ansixiyay si ay uga qayb-qaataan doorashooyinka Guud ee Golaha Wakiillada iyo kuwa Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa;
6) "**Ajanabi**": Waxa loola jeedaa Shakhsi kasta oo aan u dhalan Jamhuuriyadda Somaliland.
7) "**Warbaahinta Dawladda**": Waxaa loola jeedaa idaacadaha, Wargeysyada, Shineemooyinka, Telefishanka Qaranka iyo nooc kasta oo warbaahineed oo ay Dawladdu maamusho;
8) "**Hantida Dawladda**": Waxaa loola jeedaa Hantida Guurtada ah iyo Ma-guurtada ee ay Dawladdu leedahay nooc kasta ha ahaatee.
9) "**Arjiga Codsiga**": Waxaa loola jeedaa Foom gaar ah oo uu diyaariyay Gudidda diwaan-gelinta Ururda siyaasada iyo ansixinta xisbiyada oo faahfaahinaaya shuruudaha laga rabo in uu buuxiyo Urur Siyaasadeed kasta oo is diwaan-gelinaya.
10) "**Doorashooyinka Qaranka**": Waxaa loola jeedaa doorashooyinka Guud ee ay ku tartamayaan Saddexda Xisbi Qaran.
11) "**Hoggaamiyeyaasha Xisbi/Urur Qaran**": Waxaa loola jeedaa hoggaanka sare ee Xisbi/Urur oo uu ka mid yahay Guddoomiyaha, Gudoomiye-kuxigeennada, Xog-hayaha Guud iyo ku xigeenkiisa.
12) **Golayaasha sharciga ah"**: waxa loola jeedaa Golayaasha Dastuuriga ah ee JSL oo kala ah:-

b. Golaha Guurtida
t. Golaha Wakiilada
j. Golaha deegaanka

**QAYBTA 2AAD**

**Qodobka 2aad: Mabaadii'da Guud iyo U Hoggaansanaanta Sharciga**

1) Xisbiyada/Ururadu waa in ay u hoggaansanaadaan Dastuurka, Xeerarka dalka iyo hanaanka Dimoqraadiyadda, waana in aanu wax u dhimaynin midnimada dalka, dhammaanshaha dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland iyo nabadgelyada guud;
2) Xisbiyada/Ururadu waa in ay ka qayb-qaataan in ay taageerayaashooda baraan tartanka doorashooyinka iyo Dimoqraadiyadda waana in ay tix-gelin dheeraad ah siiyaan Haweenka iyo dhalinyarada.
3) Xisbiyada/Ururadu waa in aanay ku salaysnayn Qabiil, lab ama dheddig keliya, ama nooc kale oo kasta oo Bulshada kala faquuqaaya
4) Xisbiyada Qaranka iyo Ururada waxaa lagu maamulayaa si waafaqsan xeerkan isla markaana aan ka soo hor jeedsan shareecada islaamka, Dastuurka Qaranka, xeerarka dalka, iyo xeeraraka Xisbiyada ama Ururda:
5) Cid kasta oo reer Somaliland ah buuxisana shuruudaha xeerkan wuxuu xaq u yeelanayaa in uu samaysto Urur siyaasadeed si waafaqsan Xeerkan;
6) Marka ay dhacdo in laba urur iyo in ka badini isu tagaan si ay u samaystaan is-bahaysi ama Urur/xisbi ku biiro inta ka horaysa doorashada Golayaasha Degaanada, waxa loo soo gudbinayaa Gudidda Diiwaan-gelinta Ururada siyaasada iyo ansixinta Axsaabta Qaran ka nuqul asal ah (original) oo ah heshiiska isbahaysiga ah.

**QAYBTA 3AAD: QAABDHISMEEDKA IYO XILKA GUDDIDA DIWAANGELINTA**

**Qodobka 3aad: Guddida Diiwaan-gelinta Ururada Siyaasiga ah iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.**

1. Dalka JSL wuxuu yeelanayaa Guddi guud oo madax-banaan, una xilsaaran diiwaangelinta Ururrada Siyaasada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.
2. Tirada Gudiddu waa 7 (todoba) xubnood oo ugu yaraan mid ka mid ahi sharci-yaqaan yahay.
3. Gudiddu waxay iska dhexdooranaysaa Gudoomiye, Gudoomiye xigeen iyo Xoghaye.
4. Guddida waxa lagu soo xulanayaa shuruudaha hoos ku qoran:-
    b. Inuu Muslin yahay/tahay kuna dhaqmo diinta Islaamka.
    t. Inuu Muwaadin yahay/tahay da'diisuna ka yaraan 30 sanno.
    j. Inuu/inay jidh ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
    x. Inuu/inay leeyahay aqoon wax barasho oo gaadhsiisan shahaadada koowaad ee jaamacadda (First degree).
    kh. In aanu/inaanay hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo Kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno ee u dambaysay.

d. Inuu/inay yahay xilkas, dhaqankiisa iyo akhlaaqdiisuna toosan yihiin, yahayna shakhsi ku sifoobay dhex-dhexaadnimo.

r. Inuu/inay leeyahay waayo-aragnimo shaqo iyo maamul oo dhan 5 5 sanno ugu yaraan.

s. Inuu/inay ku sugnaa/sugnayd dalka JSL labadii sano ee ugu dambeeyay sixidhiidha ah.

sh. Halka sharci yaqaan waxa u dheer shuruudahaasi inay leeyahay/leedahay shuruudaha lagu soo doorto garsoorayaasha Maxkamada Sare.

5. Xarunta dhexe ee guddidu waxay ahaanaysaa Hargeysa waxayna ku yeelanayaan wakiilo gobolada iyo degmooyinka dalka.
6. Guddidu waxay xilka haynayaan muddo (2) labo sano ah oo ka bilaabanta maalinta ay Maxakamada sare xilka u dhaariso. *Madaxweynuhuna waa u cusboonaysiin karaa hadii loo baahdo, iyada oo muddo kordhintaasi cusub laga ansixin doono Gollaha Wakiilada.*

   *B. Xubnaha Guddida waxaa xilka lagaga qaadi karaa habka loo maro xilka qaadista Komishanka Doorashooyinka Qaranka.*

   *T. Hadii ay dhacdo mudadii xilka Gudida oo aan dhamaan ay isku mar xubnaha Guddidu baneeyaan jagooyinkoodii, Guddida cusub ee la magaacaabaa waxay dhamaystirayaan mudadii xilka ka hadhsanayd.*

   *J. Hadii Xubin ka mid ah Guddidu ay banayso xubinimada Guddida, Madaxwaynaha ayaa badalkeeda soo buuxin doona. Xubinta cusub waxa ay dhamaysan doontaa muddo xileedka u hadhsan Guddida.*

   *X. Xubinta/naha cusub waxa ansixinayaa Golaha Wakiilada inta aan xilka loo dhaarin.*
7. Madaxweynaha JSL ayaa magacaabaya Gudidda diiwaangalinta ururada siyaasada iyo axsaabta qaranka.
8. Golaha wakiilada ayaa kalabadh iyo hal (41+1) tirada guud ku ogolaanaya gudidda diwaan galinta urarada siyaasada iyo axsaabta qaranka.
9. Guddidu waxay yeelanayaan gunno la mid ah Gunada Komishanka Qaranka la siiyo.
10. Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa ku dhaarinaya Guddida dhaartan todobaad ka dib maalinta Golaha Wakiiladu ansixiyo (**WAXA IGU WALAAHIYA, BILAAHIYA, INAANAN KA MID AHAYN KUNA JIRIN UNUG, URUR IYO XISBIYO QARAN TOONA, KANA MID NOQONEYN URUR IYO XISBI KALE INTAAN XILKA HAYO. UGUNA ADEEGAYO BULSHADA SOMALILAND CADAALAD, SINAAN IYO DAACADNIMO**).

## QAYBTA 4AAD: DIIWAANGELINTA IYO HABRAACA

### Qodobka 4aad: Codsashada Diiwaan-gelinta iyo Qabashada Araajida

1. Guddidu waxay ku baahinaysaa warbaahinta dalka mudada qabashada codsiyada diiwaangelinta Ururada siyaasadeed, iyo mudada dhamaadka qabashada codsiyada diiwaangelinta. Mudada qabashada codsiyada diiwaangelintu waa ~~laba bilood gudahood (lixdan maalmood) oo ka bilaabmaysa maalinta la bilaabo baahinta qabashada codsiyada~~ *shan iyo afartan maalmood gudahood (45) oo bilaabmaysa maalinta la daabaco ama la sii daayo baahinta qabashada codsiyada.*

2. Urudada siyaasiga ah ee cusub waxay is ka diwaan galinayaan xarunta guud ee Gudida diwaan galinta ururada siyaasad iyo axsaabta qaranka ee Hargaysa.
3. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo Urur siyaasadeed waa inuu ku soo qortaa arji foomka loogu talagalay, kuna soo hagaajiyaa Guddida, kuna lifaaqnaadaan caddaymaha iyo qoraalada soo socda:-
   - b) Goortii iyo goobtii ururku ku qabtey shirkii aasaaska ee ugu horeeyay.
   - t) Liiska magacyada aasaasayaasha ururka iyo habkii loo doortey.
   - j) Liiska magacyada hogaanka, gudidda fulinta iyo golaha dhexe oo gudoomiyaha ama ku-xigeenku soo sexeexay.
   - x) Qaab-dhismeedka ururka oo ay ku caddahay magaca ururka oo dhan iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo iyo astaanta ururka.
   - kh) Caddeyn bixin cashuurta diwaan gaklinta oo dhan **150, 000,000** (Boqol iyo konton milyan) shilin Somaliland.
   - d) *Waxaa waajib ah in lacagta cashuurtu cadahay in la wadaagey oo aysan ka bixin gacan qudha, waxaana dabagal ku samaynaya Guddida Diiwaan-gelinta.*
   - r) Xisbiyada qaran ee haysata shahaadada xisbi nimo laga ma qaadayo cashuurta diwaan galinta.
   - s) mudada liisanka ee xisbi qaran waa toban (10) sano oo ka bilaabma taariikhda liisanka la siiyay.

**Qodobka 5aad: Xisbiyadda Qaran iyo Urarada ku meel gaadh ka ah**

1. Markay dhamaato mudada qabashada araajida diiwaangelinta Ururrada, Gudiddu diwaangalintauruada siyaasiga ah iyo ansixinta axsaabta Qaranka waxay hubinaysaa ururada buuxiyey shuruudihii looga baahnaa, waxayna siinayaan ogolaansho ku meelgaadh ah oo uu ururkaasi ku hawlgalo.
2. ~~Mudada hawl-galada ururada siyaasadeed waa 6 bilood oo ka bilaabanta taariikhda ogolaanshaha ku meel gaadhka ah la siiyey.~~ *Muddada hawlgalada ururada siyaasadeed waa lix (6) bilood gudahood waqtigana waxaa cayimaya Guddida Diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Anxisinta Axsaabta Qaranka iyaga oo la tashanaya Guddida Doorashooyinka Qaranka.*
3. Xisbi/Urur kasta waa inuu ku keenaa mudada ku xusan Faqrada 2aad ee Qodobkan qoraalada iyo caddeymaha soo socda:-
   - b. Qabashadii shirweynaha ee Ururka ama xisbiga, meeshii uu ku qabtey, taariikhduu qabsoomay iyo wixii ugu weynaa ee ay qabteen, Sida liiska magacyada xubnaha golaha dhexe, Golaha Fulinta iyo magacyada hogaanka xisbiga.
   - t. Caddeyn in Ururkaasi ku leeyahay laamo hawlgal ah, ugana diiwaan-gashan yihiin ugu yaraan 1000 (Kun qof) xubnood gobol kasta, kuwaas oo haysta warqda aqoonsiga muwaadinimo oo sharci ah.
   - j. *Muddada liisanka ee xisbi qaran waa toban (10) sano oo ka bilaabanta taariikhda liisanka la siiyay.*
4. Ururka la siiyo ogolaansho ku meel gaadh ah oo uu ku hawl-galo, waa in Guddidu siisaa afar (4) nuqul oo xeerkan ah
5. Xisbi/urur kasta oo siyaasadeed waa in xeerkiisa ku caddahay ku dhaqanka dimoqraadiyadda, tallo-wadaaga iyo maamul wanaag.

6. Urur kasta waa inuu gudidda u keeno 3 nuqul oo daabacan oo ah xeerkiisa iyo cinwaanadiisa gobolada iyo degmooyinka dalka.
7. Xisbi/urur kasta waa in xeerarkiisu waafaqsan yahay Dastuurka iyo Xeerarka dalka JSL.
8. Xisbi/Urur kasta waa inuu xubin ka noqon karo qof kasta oo Somalilander ahi
9. Ururka siyaasadeed ee loo ansixiyo xisbi, kuma biiri karo Xisbi kale doorashooyinka ka hor iyo kadib, sidoo kale waa iney xeerkiisa ku caddaataa inaan laga saari karin/eryi karin xisbiga xubin ama xubno loo doortey Golayaasha sharciga ah haadii aanay ka hor imanayn xeerar ka dalka iyo xeerka xisbiga.
10. Xisbi kasta oo siyaasadeed waa inay barnaamijkiisa ku caddaato qorshayaashan:-
    - b. Sugidda nabadgelyada, deganaanshaha iyo xasiloonidda dalka.
    - t. Horumarinta waxbarashada iyo Diinta
    - j. Horumarinta caafimaadka iyo fayo-dhawrka.
    - x. Daryeelka iyo ilaalinta degaanka.
    - kh. Dhaqaaleynta iyo soo saaridda kheyraadka dabiiciga ah ee dalka
    - d. Horumarinta cilmiga iyo teknoolajiyada.
    - r. Dhiiri gelinta dhalinyarada iyo haweenka ee ka qayb qaadashada siyaasada dalka.
    - s. Ilaalinta Dastuurka iyo xeerarka dalka.

**Qodobka 6aad: Kala reebida Xisbiyada/Ururda ku tartama doorashada Deegaanka**

1. Saddexda xisbi/Urur ee doorashada Dawladaha Hoose ka hela 20% codadka gobol kasta ayaa loo aqoonsanayaa Xisbi qaran, lana siinayaa shahaadada aqoonsiga xisbi.
2. Haddii hal xisbi oo keliya ku guulaysto doorashada oo uu ka helo 20% codadka gobol kasta, Guddidu waxay u aqoonsanaysaa xisbiyo Qaran isaga iyo labada Xisbi ee ku xiga isu gaynta codadka boqolayda gobol kasta.
3. Hadii ay is leekaato tirada Boqoleyda Gobolada ee laba Urur ama ka badan waxaa lagu kala saarayaa. Sida ay ugu kala Bataan tiradada guud ee codad ka.
4. Haddii ururada siyaasadeed midna gaadhi waayo 20% waxay Guddidu u aqoonsanayaan Xisbiyo Qaran saddexda Xisbi ee ugu tirada badan codadka doorashoonyinka boqolayda gobolada dalka.
5. Tobankii (10) sannadoodba mar baa la abuuri karaa Urur Siyaasadeed si waafaqsan Xeerkan. Hase-ahaatee waa in Urur Siyaasadeed la abuuraa ugu yaraan 6(lix) bilood ka hor maalinta la qabanaayo doorashada Goleyaasha Deegaanka.

**Qodobka 7aad: Waxyaabaha ka reebban Xisbiyada/Ururada**

1. Waxaa ka reebban xisbi/urur kasta inuu u soo gudbiyo Guddida war bixin been ah ama khaldan.
2. Xisbina kama muuqan karto xeerarkiisa qodob ama qodobo ka hor imanaya Dastuurka iyo Shareecada Islaamka.
3. Xisbi/Urur kasta waxaa ka reebban inuu dhaqaale ka helo illo shisheeye.
4. Xisbi/urur kasta waxaa ka reebban inuu hantida qaranka Somaliland u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee doorashooyinka.

5. Xisbi/urur kasta waxaa ka reebban inuu adeegsado koox ama ciidan hubaysan oo uu ku fushado danihiisa gaarka ah.

**Qodobka 8aad: Xuquuqda Xisbiyadda Qaranka**

1) Xisbiyada Qaranka ee la siiyey shahaadada xisbinimo siyaasadeed, waxay xaq u leeyihiin:
   b. Inay si siman u adeegsadaan warbaahinta qaranka, waxayna yeelan karaan Warbaahin u gaar ah markey ogolaansho ka helaan hay'adaha ku shaqada leh.
   t. Inay si xor ah u gudbiyaan afkaartooda siyaasadeed iyagoon wax u dhimayn xasiloonida iyo nabadgelyada guud ee dalka.
   j. inaan la cabudhinkarin mas-uuliyiinta xisbiyada ciidamada amaankuna aanay gali karin xarumohooda ilaa ogolaasho laga helo Maxkamadda awooda u leh,
   x. xisbiyada Qaranka ee mucaaridka ahi way dhaliili karaan xukuumada
   kh. Xisbiyadu wixii dacwad ama cabashooyin ay ka tawdaan shaqada Guddida diwaan galinta ururada siyaasada iyo ansixinta axsaabta Qaranka waxay qoraal ahaan ugu gudbinayaan maxkamadda gobolka ay cabashadu ka jirto.
   d. Haddii ay ku qanci waayaan go'aanka maxkamadda gobolku ka soo saarto, waxay racfaan uga qaadanayaan Maxkamadda Dastuuriga ah
   r. Xibiyada qaranku way yeelan karaan hanti gaar ah.

**Qodobka 9aad: Xuquuqda Muwaadiniinta**

Muwaaddin kasta oo qaangaadh ah, wuxuu xaq u leeyahay:-

1. Inuu/inay ka qayb-qaato hawlaha siyaasadda.
2. Inuu/inay ku biiri karo xisbi ama urur siyaasadeed kuu/kay doorto.
3. Xubnaha ururku ama xisbigu waxay leeyihiin xuquuqo isku mid ah xaqa doorashada iyo codayntaba marka lagu guda jiro xilliga doorashada xisbiga/ururka gudihiisa.
4. Xubin kasta oo doonaysa in ay ka baxdo xil xisbi ama urur.
   b) Waa in xubinta xisbiga/ururku u soo gudbisaa arjiga is casilaada.
   t) Waa in xisbiga /ururku ku aqbalaa ama ku diidaa 14 maalmood gudahood is casilaada xubinta.
5. Xubinina kama wada tirsanaan karto laba Xisbi/Urur ama Xisbi iyo Urur isla wakhti keliya.

**Qodobka 10aad: Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada**

Xubin ka tirsan Xisbi ama Urur waxaa laga saari karaa oo keliya marka:

b) Ay samaysato urur kale
t) Ay Ka qayb-qaadato urur kale oo la samaynayo
j) Ay Ku biirto urur kale ama si caam ah ugu ololaysa samaysiga urur kale
x) Ay ku gafto xeerka u yaalla xisbiga/ururka

**Qodobka 11aad: Musharixiinta u Tartamaysa Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo deegaanka**

1) Qof kasta oo muwaadin Somaliland ahi wuxuu xaq u leeyahay in la doorto, waxna dooran karo, hase yeeshee waxaa musharax noqon kara:-
   b. Muwaadin Somaliland ah, xisbina soo sharaxay, buuxiyeyna shuruudaha Xeerku jideeyey.
   t. Ma banana in musharax madax-banaan oo aan magac xisbi wadanin isa soo sharaxo.
2) Gudidda fulinta ee xisbiyada ayaa soo magacaabaya musharixiinta uga qayb galaya doorashada Golaha Wakiiladda.
3) Gudidda Xisbiga ee Gobol kasta ayaa soo magacaabaya musharaxiinta heerka degmooyinka.
4) *Mar kasta oo la furayo tartanka ururada siyaasada ee G/Degaanka lix bilood ka hor, muddanaha ka tirsan Golaha Wakiilada ama Golayaasha Degaanka waxaa u bannan inuu furan karo Urur siyaasaded oo cusub ama uu ku biiri karo urur/xisbi siyaasadeed ee uu doono.*

**Qodobka 12aad: Mudada xilka Madexweynaha iyo Gudoomiyaha Xisbiga**

1. Qofna jagada madexweynaha ma qaban karo laba jeer wax ka badan.
2. Xisbi qaran jagada gudoomiyaha xisbiga uma sharixi karo xubin laba xildoorasho wax ka badan.

**QAYTA 5AAD: XEER-HOOSAADKA, QAAB-DHIMEEDKA IYO SHAQADA URURRADA SIYAASADDA**

**Qodobka 13aad: Xeer-hoosaadka iyo Qaab-dhismeedka Ururrada Siyaasadda**

Xeer-hoosaadka Ururrada Siyaasadda waa in ay ku cad yihiin waxyaalahani:-

1. Magaca Ururka oo dhamaystiran.
2. Ujeeddooyinka Ururka.
3. Qaab-dhismeedka Ururka iyo Waaxyaha uu ka kooban yahay.
4. Xarunta dhexe ee Ururka oo ah Somaliland gudaheeda.
5. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee mas'uuliyiinta. Ururka.
6. Shuruudaha Xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo, iyo iscasilaadda xubinta ama mas'uulka
7. Qodobbo khuseeya sida Xeer-hoosaadka Ururka wax looga beddeli karo.

**Qodobka 14aad: Reebbanaan**

Uma banaana qof kasta oo ka tirsan Ciidammada Qalabka sida: Ciidanka qaran, Booliska, Ciidanka Asluubta, hay'adaha sirdoonka qaranka, Ururada aan Dawliga ahayn, shaqaalaha dowlada (civil servant) iyo xubnaha ka tirsan Garsoorka, Xeer-ilaalinta, iyo gudidda diwaan galinta ururada siyaasada iyo ansixinta xisbiyada qaranka in ay:

1. Samaystaan Urur Siyaasadeed iyo xubin ka-noqoshadiisaba.
2. In loo magacaabo xafiis Urur Siyaasadeed.

3. Ku lug-yeelato arrimo Axsaab/Urur oo luminaaya dhex-dhexaadnimada xafiiska uu joogo.
4. Taageerid ama ka-soo-hor-jeedsi Xisbi/Urur Siyaadadeed.

**Qodobka 15aad: Astaamaha iyo Magacyada**

Ururna ma isticmaali karo astaan ama magac uu hore u isticmaalay Urur kale, xisbi, Hay'adaha Dawladda ama Qaranka Somaliland.

**Qodobka 16aad: Hoggaamiyeyaasha Xisbi/Urur Siyaasadeed**

Qofka isu sharraxaaya hogaanka Xisbi/Urur Siyaasadeed waa in uu buuxiyo shuruudahan:

1. Waa inuu/inay yahay muwaaddin reer Somaliland ah.
2. Waa in/inay ay da'diisu tahay ugu yaraan 30 jir.
3. Waa in/inay aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ah fal-dambiyeed uu gaystay oo ka badan 3 (saddex) sanno 5tii sanno ee u dambaysay marka laga reebo in Madexweynaha JSL uu siiyay cafis.
4. Waa in/inay uu yahay qof muslin ah kuna dhaqma diinta islaamka.

**Qodobka 17aad: Isbeddelka Hoggaanka iyo shuruucda Xisbiga/Ururka**

1. Isbeddel kasta oo lagu sameeyo hoggaanka, shuruucda iyo Qaab-dhismeedka Xisbiga/Ururka waa in laga sheego warbaahinta ugu badnaan 15 maalmood ka dib marka uu Xisbigu/Ururku qabsado shirka uu ku gaadhay go'aanka isbeddelkaas.
2. Isla markaana waa in qoraal rasmi ah oo arrintaa ku saabsan loo diro xeer-ilaalinta iyo komishanka doorashooyinka qaranka mudo aan ka badnayn 15 maalmood.

**QAYBTA 6AAD: WARBAAHINTA IYO HANTIDA XISBI/URUR SIYAASADEED**

**QODOBKA 18AAD: WARBAAHINTA XISBIGA AMA URURKA**

1. Xisbi/Urur Siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro Warbaahin uu gaar ah si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka ee khuseeya warbaahinta gaarka ah.
2. Xisbi/Urur Siyaasadeed waxa ka mamnuuc ah in ay faafiyaan, daabacaan ama baahiyaan warar been ah, isla markaana abuuraaya kicin iyo iska-hor imaad dadweyne, wiiqaaya midnimada dalka, ama waxyeello u gaysanaaya nabadgelyada guud.
3. Xisbiyada/Ururada Siyaasaddu waxay si siman u isticmaalayaan warbaahinta ay Dawladdu maamusho wakhtiga ololaha doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 19aad: Hantida Xisbi/Urur**

Hantida Xisbi/Urur waxa ay ka iman kartaa:

1. Qaadhaanka ay xubnaha Xisbi/Urur bixiyaan.

2. Deeqda la siiyay Xisbiga/Ururka waa in ay ka timaado shirkado wadani ah, ama muwaadiniin reer Somaliland ah.
3. Kaalmo ay si siman u bixisay xukuumadu.

**QAYBTA 7AAD: XISBIYADA SIYAASADDA EE JIRA**

**Qodobka 20aad: Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Xisbiyada**

1. Saddexda xisbiyo Qaran ee loo aqoonsado xisbiyo qaran waxa ay leeyihiin Shakhsiyad Qaanuuni ah (Legal Personality).
2. Xisbiyada Siyaasaddu waxa ay xaq u leeyihiin in ay u tartamaan Doorashooyinka Deegaanka ee soo socda. Haseyeeshee waa in ay Gudida diwaan-gelinta u soo gudbiyaan waxyaalahan:-
   a. Magaca Xisbiga oo dhamaystiran
   t. Ujeeddooyinka Xisbiga;
   j. Qaab-dhismeedka Xisbiga iyo Waaxyaha uu ka kooban yahay
   x. Xarunta dhexe ee Xisbiga oo ah Somaliland gudaheeda
   kh. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee mas'uuliyiinta Xisbiga,
   d. Shuruudaha Xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo, iyo iscasilaadda xubinta ama mas'uulka.
   r. Qodobbo khuseeya sida Xeer-hoosaadka Xisbiga wax looga beddeli karo.

**Qodobka 21aad: Ganaaxa ku xad-gudubka xeerka**

Gudiddu waxa ay ganaax lacageed oo dhan Sodon milyan oo shillinka Somaliland ah (**30,000,000 SL/Sh**) ku soo rogayaa Xisbiga/Ururka ku xad-gudba Xeerkan.

**QAYBTA 8AAD**

**Qodobka 22aad: Waxyaabaha ka reeban adeegsiga deeqaha dawladda siiso Xisbiyada**

Deeqaha dawladda looma isticmaali karo si toos ah ama si dadban in loogu qorsheeyo samaynta ganacsi gaar loo leeyahay, ha ahaato hanti guurto ah ama tu ma-guurto ahba.

**Qodobka 23aad: Xisaabxidh**

1. Xisbi Qaran kastaa waxaa uu samaynayaa xisaab xidh sanadedd (dakhli iyo kharash) uu soo cadeeyay hanti dhawre madex banaan, waxaana loo gudbinayaa komishanka doorashooyinka Qaranka ugu danbayn 31 March ee sanad kasta.
2. *Hanti dhawraha madaxa banaan waxaa codsanaya hawlgalkiisa komishanka Dooroshooyinka Qaranka ama Guddida Diiwaangleinta Ururada.*

**QAYBTA 9AAD: QODOBBO KALA DUWAN**

**Qodobka 24aad: Xisbiga Dhaca ama Ururka U Gudbi Waaya Xisbi**

1. Xisbi kasta/Urur oo ku guulaysan waaya doorashada Golayaasha deegaanka waxay ku biirayaan iyaga iyo Xubnahooda golayaasha deegaanka ee ay ka helaan degmooyinka dalka saddexda xisbi qaran ee soo baxay kay doonaan, waxayna qoraal ahaan ugu gubinayaan Gudidda Diiwaangalinta mudo aan ka badnayn hal bil (30 maalmood).
2. Hadii xisbigii mudanaha Golaha wakiiladu uu ka tirsanaa ku dhaco tartarka Ururada iyo Xisbiyada waxaa mudanuhu ku biiri karaa xisbiga uu doorto, wuxuuna dhamaysanayaa mudo xileed ka u hadhsan.
3. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisu waxay dhamaysanayaan mudada xilkooda inta uga hadhsan hadii xisbigoodu soo bixi waayo waxaana u furan inay galaan xisbigay doonaan.

**Qodobka 25aad: Tayaynta iyo habaynta xisbiyada Qaranka**

1. Xisbiyada Qaranka ee Doorashada ku guulaystaa waa in ay ku dhaqmaan maa-mul wanaag iyo dimuquraaduayad dhexdooda ah, waana in awooda loo siman yahay. Talada xisbigana waa in mar kasta lagu go'aan qaataa qaabka uu dhigaayo xeer hoosaadka.
2. Shirweynaha Xisbi Qaran waxaa la qabanayaa **5** (shantii sano) hal mar waxaana la baahinayaa lixdan (60) maalmood ka hor.
3. Shirka xisbi ee golaha dhexe waxaa la qabanayaa halkii sanaba mar waxana la baahinayaa 30 casho ka hor.
4. Shir waynaha xisbiga waxa lagu soo dooranaya.
   b. Xubnaha hogaanka xisbiga iyo guddida fulinta
   t. Xubnaha Golaha dhexe ee xisbiga
   j. Waxaa lagu ansixinayaa barnaamijka iyo xeer-hoosaadka xisbiga.
5. Liiska xubnaha golaha fulinta iyo golaha dhexe ee xisbi iyo nuqul xeer-hoosaadkooda ah waxaa loo gudbinayaa xeer-ilaalinta, komishanka doorashooyinka qaranka iyo gudida diwaan gelinta mudo aan ka badnayn 30 maalmood shirwaynaha ka kib.
6. Hogaanka xisbiga, Guddida fulinta iyo xubin golaha dhexe waxaa xilka qaadistooda soo jeedin kara.
   b) 1/3 xubnaha golaha dhexe ee xisbiga.
   t) Gudoomiyaha xisbiga.
   j) Is-casilaad.
   Waxaana cod kala-badh iyo hal ku ansixinaya xubnaha golaha dhexe ee xisbiga.
7. Gudidda diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka ayaa xisbiyada dhexdooda ku ilaalinaya Dimuqraadiyada, iyagoo war bixintooda u soo gudbinaya Golaha Wakiiladda marka loo baahdo.
8. Marka mudo xileedka Gudidda diwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka uu dhamaado waxaa shaqadooda la wareegaya komishanka doorashooyinka qaranka.

**Qodobka 26aad: Soo Saaridda Xeer-Nidaamiye (Power to Issue Regulations)**

Gudida Diwaangelinta Ururadda Siyaasadda iyo Ansixinta Xisbayada Qaranku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer-nidaamiye (Regulations), Xeerka Hab-dhaqanka (Code of Conduct) iyo Awaamiir (Directives) aan ka hor imanayn xeerka.

**Qodobka 27aad: Laalis**

1. Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda (Xeer Lr. 14/2000) waxaa badalay **Xeer Lr..14/2011**
2. Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkani waa waxba kama jiraan (null and void).

**Qodobka 28aad: Dhaqan-galka**

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

*Qodobka 29aad: Khilaafaadka ka Dhasha Xisbi/Urur Dhexdii ama Laba Urur/Xisbi*

1. *Haddii xubnaha xisbi ama urur isku khilaafaan hogaanka ama u kala jabaan laba meelood iyo wax ka badan, hay'adaha xisbigu/ururkuna xalin kari waayaan khilaafka, waxa dhinicii danaynayaa dacwad u gubinayaa Gudidda Diwaan-gelinta Ururada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka.*
2. *Gudiga diiwaan gelintu markuu helo dacwadda ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan, wuxuu ka soo saarayaa go'aan ku salaysan Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadeed ee Xeer lam. 14/2011 iyo dastuurka xisbiga/ururka hogaankiisa laysku haysto ee laga diiwaan geliyey Guddida Diiwaan-gelinta.*
3. *Dhinicii ku qanci waaya go'aanka gudidda diiwaan gelinta waxaa u bannaan in uu racfaan u qaato Maxkamadda Sare, xukunkeeduna wuxuu noqonayaa kama dambays.*
4. *Haddii dhinacyada is hayaa la yimaadaan laba dastuur oo is khilaafsan oo loo sameeyey ururka/ xisbiga hogaankiisa laysku haysto, waxaa la tixgelinayaa dastuurka laga diiwaan geliyey guddida diiwaan gelinta ee lagu aqoonsaday ururka/xisbiga.*
5. *Haddii khilaafka farqadaha hore ku qorani yimaado inta aan ururka la diiwaan gelin ee aan aqoonsiga la siin, gudidda diiwaan-gelintu ma diiwaan gelinayso magaca ururka hogaankiisa laysku khilaafay.*
6. *Dhinacyadana waxaa u banaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.*
7. *Haddii laba urur ama urur iyo xisbi isku qabsadaan magaca ama astaanta diiwaan-gelinta ka dib, waxaa loo aqoonsanayaa in uu leeyahay magacaas ama astaantaas kan Gudiddu u diiwaan gelisey ama loo hor diiwaan geliyey.*

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro** |
| **Xog .Guud ee Golaha Wakiilada** | **Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL** |
| **……………………………………..** | **…………………………………………….** |

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REF: JSL/M/XERM/219-683/082011** **DATE: 20/08/11**

**XEER MADAXWEYNE NO. 0168/082011**

**DHAQAN-GALKA XEER LR. 14/2011**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-15/534/2011, ee Ansixinta Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda,

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Wuxuu Soo Saaray,

Dhaqan-galka Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 14/2011.

Alla Mahad Leh

**Ahmed Maxamed Silanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REF: JSL/M/XERM/249-804/122011** **DATE: 13/12/11**

**XEER MADAXWEYNE NO. 0179/122011**

**Dhaqan-galka Wax Ka Bedelka yo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururada Nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasad**
**Xeer Lr. 14/2011**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-16/549/2011, ee Ansixinta wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururadda iyo Axsaabta Siyaasadda;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Wuxuu soo saaray:-

Dhaqan-galka wax ka Bedelka iyo Kaabista xeerka Nidaamka Ururada iyo Asxaabta Siyaasadda ee Jamhuuriyada Somaliland ee Xeer Lr. 14/2011 ee Qodobadan hoos ku xusan:-

Qodobka 3aad, Faqradiisa 6aad, Xarfaha B,T,J.X
Qodobka 4aad, farqadiisa 1aad
Qodobka 4aad, Farqadiisa 3aad
Qodobka 5aad, Farqadiisa 2aad
Qodobka 5aad, Faqradiisa 3aad, xarafka J
Qodobka 11aad, Farqadiisa 4aad
Qodobka 23aad, Farqadiisa 2aad iyo
Qodobka Cusub oo ah Qodobka 29aad

ALLAA MAHAD LEH

**Ahmed Maxamed Silanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**